Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya
Baarlamaanka Federaalka Soomaaliya
Golaha Shacabka

Hadal-qoraalka kalfadhiga 7-aad
Documentiga Kal.7-aad kul.2-aad **31/10/2015**

Kalfadhiga 7-aad
Kulankiisa 2-aad Saac.fur.12:00gd.Saac.Xir.1:13 gd.
Guntinta(Quorum) 143-Xildh.
Ajendaha:-

1. **Furitaanka Aayadaha Qur'aanka Kariimka ah**
2. **Ansaxinta Ajendaha**
3. **Dhaarin Xildhibaan**
4. **Warbixinta Shirkii Baarlamaanka Carabta ee Tunisia –prof .Dhalxa**
5. **Dooda Hindise Sharciyeedka Maal-gashiga Shisheeye.**

1.Shir-guddoomiye, Guddoomiye K/Xigeenka 1-aad JFS Mudane Jeylaani Nuur Iikar .
Waxaa shirka Furey Guddoomiye K/Xigeenka 1-aad Baarlamanka JFS.Mudane, Jeylaani Nuur Iikar waxaa lagu furey Aayadaha Qur-aanka Kariimka ,uuna akhriyey Xildhibaan Sheekh Shaacir.
Kadib, Guddoomiyaha wuxuu soo jeediyey in la ansaxiyo Ajendaha ,Xildhibaanadana way ansaxiyeen.
2. Guddoomiyaha wuxuu kaloo sheegay in **Xildhibaan Maxaned Xuseen Xagaafe uu booskiisa Xildhibaannimada baneeyey laguna bedelay Liibaan Cusmaan C/raxmaan .**
3.Guddoomiye wuxuu u yeeray Xildhibaan Maxamed Cumar Dhalxa si uu faah-faahin ugu bixiyi Shirkii Baarlamaanada Carabta ee lagu qabtey Dalka Tunisiya 04-08 Okt.2015kii
Intaa ka dib ,Xildhibaan Dhalxa wuxuu akhriyey warbixintii Baarlamaanada Carabta isagoo sheegay in markii hore fariisin rasmi u aheyd Ururka Dalka Suuriya ee Magaala Madaxda Dimishiq inta dagaalka sokeeye uunan ka dhicin Dalkaas ,kadibna si KMG ay ururku ugu dhigteyn Dalka Masar,mararka qaarna lagu qabto meel ka mid ah Dalalka Carabta .Ajendayaasha looga hadley waxay ahaayeen 11 Ajende waxay kala ahaayeen:

- Qadiyadda Reer Falastiin ,xadgudubka Yahuuda iyo qaabka loo arkey Calanka Falatiin oo markii ugu horeysey laga taago Xarunta Qaramada Midoobey.
- Dagaaladda ka socda Dalka Suuriya iyo loolanka Mareykanka iyo Ruushka.
- Duqeynta Dowladaha Khaliijka ay ku wadaan Xuutiyiinta Yamen iyo qaxa ka dhashay.
- Dhibaatada Dalka Liibiya iyo dadaalka loogu jiro in nabad laga dhaliyo dalkaas .
- In la baajiyo in uu ka dhex dahasho dagaal Diimeed dhexmara dadka walaalaha ah ee Ciraaq Shiiciyiinta iyo Sunayiinta.
- Doorashada Baarlamanka ee Dalka Masar iyo Xubnaha Guddiga BFS nasiibka u heley inay doorashadaas ay qeybmuqgleh ka qaataan.
- Siyaasadaha is diidan ee ka dhex aloosan dowladaha Baxreyn iyo Iiraan.
- Ururka hubeysan ee Daacish dhibaatada ay ku hayaan Dunida Muslimka iyo Carabta .
- Dejinta daraasaad wax loogu qabanaayo dalalka dhaqaalahooda hooseeyo,sida Soomaaliya ,Jabuuti iyo Jasiiradaha Komoro.
- Ka hortaga iyo la dagaalanka Argagixida Caalamiga ,Burcad badeeda tahriibka sharci darada ah iyo dhamaan ficiladda ka soo horjeeda Sharciga Islaamka ,qawaaniinta Dowliga ah iyo Xuquuqul Insaanka iyo iwm
- In Jaamacadda Carabta lagu xisaabtamo hirgelinta Go'aamada ay gaaraan Baarlamanka iyo Madaxda Sare ee Dowladaha Carabta

.

Guddiyada Baarlamaanka Carabta iyadoo ka shidaal qaadanaaya Ajendaha Sare ka xusan waxay Guddi kasto soo diyaariyeen warbixino kala duwan ugu danbeyntiina ay Guddigu doorbideyn in waxlagala qabto qodobada hoos ku xusan soona kala saxiixdeyn Qodobaddaa :

1. In Soomaaliya loo fidiyo taageero lagu hormarinaayo Hay'adaheeda Dastuuriga ah si ay u hanato hanaankeeda Qarannimo iyo Haybadeeda Dowlanimo
2. In Soomaaliya loogu yabooho Mashaariic Shaqo loogu abuurayo Dhallinyarada ,laguna hormarinaayo kheyraadkeeda beriga ,badda iyo wax soo saarka kale ,si looga baajiyo:Jahliga ,Cudurka iyo Saboolnimada .
3. In Soomaaliya aan lagu faragelin umuuraheeda u gaarka ah, loona daayo xal ka gaarista dhan kasta ,wixii khuseeya Midnimadeeda si toos ah iyo si dadban.
4. In si cad loo hor istaago Kaaluumeysiga sharcidarada ah iyo sunta khatarta ah ee Maraakiibta shisheeye ku soo shubaan xeebaha Soomaaliya kuwaana lala tiigsado Maxkamadda Caalamiga ah ,magdhawna looga qaado dadka Gabood-falka ku sameeyey Dalka iyo dadka Soomaaliyeed.

Markuu shirkii dhamaadey ,waxay guddiga kulumo gaar-gaar ah kula yeesheen Hotelka Africa Xildhibaano ka socdey Golaha Baarlamanka Tunisiya ee Tuunis waxay labada dhinac isku afgarteyn: -

- In la mataaneeyo labada Baarlamaan Soomaaliya iyo Tunisiya
- In lays dhaafsado wufuud u soo gogol-xaarta labada Gole ,si ay isugu gudbiyaan khibradahooda.

- In Dastuurka Soomaaliya iyo Xeer-hoosaadka oo hadda ku qoran Af-Soomaaliya iyo Ingelish ,lagu turjamo Af-Carabi ,maadama Soomaaliya ay tahay Dal Carab ah.
- In dib loo furo Safaaradii Soomaaliya ay ku laheyd dalka Tuunis ee Tunisia,si ay u fududaato isku xirka laba dal iyolabada shacbi
- In Jaamacadda magaca weyn ku leh mandiqada Carabta loo yaqaan **Jaamacadda Seytuun eek u taala Tunisia ay deeq waxbarasho tababaro iyo aqoon kororsiba u fiyaan dhallinyarada isbedeldoonka ah Soomaaliyeed.**

4.Guddoomiyaha wuxuu sheegay in xildhibaanada kale ay keenaan warbixintooda sidaan oo kale.

Wuxuu intaa ku darey in doodii ay bilaabaneyso ay Xohaynta soo qoraan Xildhibaanada dooda ka qeybqaadaneysa.

5.kadib ,waxaa bilaabatey doodii Hindise Sharciyeedkii Maalgashiga Shisheeya ,ugu horeyntiina Guddoomiyaha wuxuu u yeeray Xildhibaankii ugu horeeyey.

- **Xildh. Saciid Maxamed Cali,** marka hore wuxuu u mahadceliyey Guddigii iyo Wasaaraddii ka soo shaqeeyeen Hindise Sharciyeedkaan .wuxuu sheegay Bogga 3-aad iyo Qodobka 3-aad oo sheegaye Guddiga eegaya uu kamid noqdo Agaasiimaha Guud ee Wasaaradda Warshadaha iyo Ganacsiga .**Wuxuu soo jeediyey in lagu daro Agaasiimayaasha Beeraha iyo Xoolaha , loona sameeyo Guddi Hoosaadyo ay ku jiraan Engineero iyo Aqoonyahano. Wuxuu intaa ku darey in la faah-faahiyo Qod.12-aad ee sharcigaan .laguna daro in macaashka iyo canshuuraha Dowladda ay ku leedahay laga reebo.**
- **Xildh.Maxamed C/laahi Faarax(Geesey),** wuxuu sheegay in meesha ay ku qorantahay in Wasaaradda awood ugu leedahay,**wuxuu soo jeediyey in laga dhigo Cidda wax soo gelineysa oo ah Shirkadaha Dalka .**
- **Xildh. Maxamed Cumar Dhalxa**, wuxuu sheegay in marka Maagashi laga hadlaayo loo baahanyahay **Xoolaha ,Beeraha iyo Badda .wuxuu sakangareeyey in mudnaanta la siiyo Beeraha iyo Xoolaha . Wuxuu intaa ku darey in Shaqada Guddiga Arrimaha Dibadda uu lahaa uu Guddi kale iska qaatey .Wuxuu soo jeediyey in Xukuumadda ay caddeyso waxay soo gudbineyso.wuxuu su'aaley , waa sidee sida loo sixikaro haddu Khaladyimaado .**
- **Wasiirka Xildh. Xasan** wuxuu sheegay in Wasaaradda Arrimaha Dibadda ay dhammaan ka gadeyso Adduunka wax soo saarka Dalka.wixii qorshe ah ee dalka waxaa soo diyaarisa Wasaaaradda Qorsheynta Qaranka.
- **Xildh.Nadiifo Cusmaan ,** waxay sheegtey in warqadda 1-aad lam.19-aad ay ku qorantahay 1987kii,waxay weydiisey in la helikaro documentiga taariikhdaas si ay tixraac ugu sameeyaan. Bishii Juun 23keeda 2015ka wixii ay soo saareyn Wasiiradda Xukuumadda in ay ka maqnaayeen doorka Haweynka iyo Dhallinyarada.Xarafka (C) kuma cadda wixii shuruuda ah .

- **Xildh. Axmed Ducaale (Xaaf) ,**wuxuu sheegay in laga tagay warshadaha ,marka Xildh. Nadiifo waxay soo qaadatey Howlaha Guud,waxaana soo diyaarisa Wasaaradda Qorsheynta marka la rabo in la sameeyo maalgashi Shisheeye , waa in faylka laga helaa baahida jirta ,Wasaaradda Qorsheynta ayada ayaa laga rabaa in ay Archieveyaariso . **Wuxuu soo jeediyey in Guddiga Difaaca ay u tagaan Wasaaradda Difaaca si isbaarooyinka loo qaado.**
- **Xildh. Xiis Muuse Cowl,** Wuxuu sheegay in lakala caddeeyo labada Wasaaradood Shaqadooda ,**wuxuu soo jeddiyey in loo dhiibo dadka lacagta haysta.**

- **Wasiir Xildh.Xasan** wuxuu sheegay in Wasaaradda Warshadaha iyo Ganacsiga ay ka mas'uul ka yihiin Maalgashiga Shisheeye ,waxayna isku xiraan Ganacsatada daneyneysa

- **Xildh. Kulalihi** , wuxuu sheegay in uu ku raacsanyahay Xildh.Saciid Maxamed oo sheegay in iyaga ay ka mid yihiin midowga Baarlamaanka Africa lacagta qaaraankana waa la bixin la'yahay**. Waxaa la soo ballanqaadey lacago Maalgashi shisheeye,wuxuu soo jeediyey in lacagtaas si wanaagsan loo qorsheeyo,wuxuu intaa ku darey in loo baahanyahay sharcigaan .Laakiin wuxuu sheegay in ay diideyn in Hantida-Qaranka la boobo. Wuxuu kaloo sheegay in ay ogyihiin in Agaasiimayaasha Guud aanan la soo marin Golaha Wasiirada.**

- **Guddoomiyaha Guddiga Ganacsiga iyo Warshadaha ,**wuxuu sheegay in lam.19-aad ee Hindise Sharciyeedka oo wax laga bedelin .waxaa lagu darikaraa dhammaan qeybaha kale .

  Wuxuu kaloo sheegay in bogga 8-aad ee qeybta bixinta ah in lagu soo daro ,**Wasaaradda ay quseyso . wuxuu soo jeediyey in ay Baarlamanka sharcigaan ay meel mariyaan. Dawlaha maalgashiga Shisheeya ku sameynaya \Soomaaliya waa Dalka Shiinaha India,Brazil.wuxuu soo jeediyey in la soo dhaweeyo Wadamadaas.**

  Guddoomiyaha ,wuxuu sheegay in uu farayo Wasaaradaha iyo Guddiga in ay ku soo daraan ra'yigii Xildhibaanada ay soo jeediyeen si loo ansaxiyo ,wuxuu intaa ku darey in fadhiga xiga uu noqonaayo Sharciga Saxaafadda.

Kalfadhiga 7-aad Kulankiisa 2-aad uu shir-guddoominaayey Guddoomiye k/xigeenka 1-aad Mudane Jeylaani Nuur Iikar uu sheegay in uu shirka xiranyahay saacaddu markey aheyn 1:11gd.